CUTUBKA 3

# Sinaanta

Ujeeddooyinka guud ee cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Gartaan xuquuqda qoomiyadaha iyo bulshooyinka ee dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka iyoltoobiya lagu qeexay.
- Gartaan waxyeelada ka dhalan karta xuquuqda qoomiyadaha iyo bulshooyinka ee sinnaanta iyo si siman uga faa'iidaysiga haddii aan la ilaalinin.
- Gartaan xaalad kasta wiilasha iyo gabdhuhu in ay siman yihiin.
- Dareemaan in ay waajib tahay in xuquuqda dadka laxaadka aan lahayn.

## 3.1 Xuquuqda ismaamul ee quruumaha, qowmiydaha iyo shucuubta

### 3.1.1 Muhiimada ay leedahay inay quruumaha, qowmiyadaha iyo shucuubta horumariyaan deeganadooda, islamarkaana si siman uga faaidaystaan xuquuqahooda

- Maxay tahay faaidada ay leedahay xurmaynta xuquuqda ismaamul ee shucuubta dalku?

Macnaha ama nuxurka guud ee sinaantu waxa weeyi waa la'aanta xaalado ay ku dheehan tahay kala sareyn xuquuqeed, fursadeed iyo mid dabaqadeedba. Ama haddii aynu si kale u dhigno, sinaantu waa xaalad siinaysa muwaadin kasta xuquuq sharaf iyo damaanad-qaad sharci oo isku mid ah, islamarkaana waa mid ka reebaysa in lagula kaco dadka/muwaadiniinta kala jeclaysi, kala soocid/kala qoqobid, IWM.

Waana xaalad xaqiijinaysa sinaanshaha fursadahooga ka qaybgal ee arrimaha bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeed iyo waliba fursadaha shaqo ee ay ka shaqaysan karaan.

Dhinaca kale, sinaanta heerar kala duduwan ayaanu u qaybin karaa. Waxaanan fahmi karaa sinaantu inay tahay mid lagu sameeyo isbar-bardhig ama tar-tarsiin laba xaaladood, labashay, ama laba ruuxba iyo wax-kabadanba. Sidaas awgeed, marka aynu ka duulo xaaladaha dhabta ah ee ka jira dalkeena, waxaa jira noocyadan sinaansho ee soo socda:-

1. Sinaanta qaramada, qowmiyaadka iyo shucuubta adalka
2. Sinaanta Muwaadiniinta
3. Sinaanta jinsiga (lab/dhadig)
4. Sinaanta luuqadaha, diimaha iyo dhaqamada.

Haddaba, haddii aan ficil lagu muujin sinaanshaha, lana odhan karo “Maxamed iyo Xaliimo ama Maryan iyo Cabdi” way siman yihiin. Balse, haddii aynu dhahno way siman yihiin, wax macna ah oo ay samayn karto ma jirto. Waxaase dhici karta in su’aal laga keeno, sinaantu maxay ku saleysan tahay? Waxaa lagu saleynayaa sinaanshaha adeegsiga xuquuqeed iyo waajibaadka. Tusaale, xuquuqda hadal ee la siiyay Cali, waa in Caasha iyo Cumar na aan loo diidin. Sidoo kale, waajibaadka Caasha iyo Cumar la saaray, waa in Calina lagu waajibiyaa. Markaas tanina waa xaalad la xidhiidha sinaanshaha ka dhexeeya Muwaadiniinta ama shaqsiyaadka kala duwan ee hal deegaan, ama wadan kuwada nool. Waxaana jirta in Dastuurka Jamhuuriyadda, Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya lagu xusay xuquuqda sinaanshaha muwaadiniinta. Tusaale, waxaa lagu qeexay xuquuqda Aadamiga iyo tan dimuqraadiyada oo faah-faahsan. Waxaana si qoto dheer u sii faah-faahinaya qodobka 25aad, xuquuqaha sinaanshaha.

Ardayeey waxaa laga yaabaa inaad maanka ku haysaan su’aashan ah

Waa maxay faa’iidada ay leedahay Sinaantu?

- Ardaydu haka wada xaajoodaan su’aasha, kadibna, jawaabta fasalka ha u soo bandhigaan.

Marka la dhawro sinaanshaha bulsho, dhaqaale, iyo tan siyaasadeedba, ee ka dhexeeya muwaadiniinta, qowmiyaadka, diimaha, Luqadaha iyo caadooyinka (dhaqamada) kala duduwan, waxaa suurtagal ah in la gaadho dimuqraadiyad, cadaalad, nabadgelyo iyo horumar waara oo ka hanaqaada dalka guud ahaan. Sidaas awgeed, sinaantu waxay door muhiim ah ka qaadataa xaaladahan kala ah xoojinta hanaanka dimuqraadiyada, xaqiijinta sinaanta shucuubta, horumarka iyo khayraadka oo si siman Deegaanadu uga wada faa’iidaystaan, iyo aslixinta (xasilinta) nabadgelyada.

### Xoojinta hanaanka Dimuqraadiyada





Jantuska 3.1. Hay’adaha Horumarka ee u dhaxeeya D/weynaha

### Baaqa ka soo yeedhaya bulshada Tuulada ee la xidhiidha Horumarka

Tuulada uu degenyahay Qorane waxaa ka jira dhibaatooyin la xidhiidha gabaabsi xaga adeegyada bulshada sida biyaha nadiifta ah, quwada korontada, iyo adeegyada telefoonada. Intayar ee Jirtana. Waxaa lagu bixiyaa garasho

iyo cad-cadaan la'aan. Dadweynaha tuuladuna, waxay qabaan wal-wal la xidhiidha mushkiladan. Masuuliyiinta Tuuladuna xilkoodi uma gudan sidii looga baahnaa ee dastuuriga ahayd. Balse, bulshada ayaa rabta inay iyadu si firfircoon ugu qayb qaadato hawlaha horumarka si loo xaliyo dhibaatooyinkooda. Hadaba, wakiilada shacabku marar badan ayay maamulka Tuulada u gudbiyeen dhibaatada bulshada ee ah in si siman loo isticmaalo adeega bulsho. Hase ahaatee, bulshadu ma helin jawaabtoodii. Maamulka Tuulahduna wuxuu ugu jawaabay, waa inaad aqbashaan sidaan anagu idiin ku talino, maadaama aynu idin matalo, islamarkaana Fulisaan waxaan idinku amarno:

## Layliska 1

Kawada xaajooda su'aalaha soo socda

1. Jawaabta ka soo yeedhay maamulka tuulada Qorane iyo ma mid ku haboon bulshada baaqee diibaa?
2. Maxaa bulshada la gudboon si ay mustaqbalka xal uhelaan.
3. Goobihiina makajiraan arimahan oo kale? Haday haa tahay, side mustaqbalka loo sixi karaa? Kawada hadla.

Dimuqraadiyadu waxay xoogaysan kartaa oo kaliya marka la helo xaalad leh sinaansho xuquuqeed oo dhinac kastaba taabanaysa sida sinaanta qowmiyaadka, sinaanta diimaha, sinaanta luqadaha, sinaanta jinsiga (lab/dhadig) IWM.

Sidoo kale, sinaantu kaalin weyn ayay ka qaadataa adkeynta/xoojinta hanaanka dimuqraadiyadeed, waayo marka la xaqiijiyo sinaan dhab ah oo ay muwaadiniintu ama shucuubtu u siman yihiin fursadaha dhaqaale, bulsho ama kuwa siyaasadeedba, ayaa la dhihi/odhan karaa hanaan dimuqraadiyadeed ayaa ka jira dalka.

Matalan, wakhtigan xaadirka dalkan Itoobiya waxaa ka jira hanaan dimuqraadiyadeed oo suurta galiyay in qoomiyaadka, diimaha, luqadaha, jinsiyada (Lab/dhadig), iyo dhaqamada kala duwani helaan sinaan dastuuri ah oo ay dhammaan kuwada noolaan karaan iyga oo aan la kala soocin ama lakala faquuqin sababo la xidhiidha isirkooda, midabkooda luqadooda ama diintooda awgeed.

Dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya waxaa lagu xaqiijiyay in Muwaadiniintu/qowmiyaadka dalku ay leeyihiin xuquuqo iyo damaanad qaad ama dhawrsanaan sharci oo isku mid ah, sidoo kalena waxaa shardi lagaga dhigay waajibaadyo siman oo ay tahay inuu ruux/muwaadin waliba fulinteeda iyadoon loo kala hadhin.

Haddaba, gunti iyo gabagabadii hanaan dimuqraadiyadeed oo xoogan/adag waxaa la gaadhi karaa oo kaliya, marka la helo sinaan cadaalad ah oo dhan kastaba leh haday tahay sinaansho dhaqan-dhaqaale, bulsho iyo mid siyaasadeedba oo ka dhaxeysa muwaadiniinta/qowmiyaadka, dhaqamada, diimaha, luqadaha, jinsiga IWM.

Si kastaba ha ahaatee, sinaantu waxay dalka iyo dadkaba u horseedaa midnimo iyo isku duubni lagu gaadhi karo dimuqraadiyad, nabadgelyo, cadaalad iyo horumar taam ah oo ka hanaqaada dalka isla markaana noqda mid ay si siman uga wada faa'iidaystaan qaramada, qoomiyaadka iyo shucuubta kala duwan ee kuwada nool dalka.

### 3.1.2 Si Deegaanada si siman looga faaideeyo horumarka, waa in la sugo nabadgelyada islamarkaana la dedejiyo horumarka

Haddii aan la dhawrin sinaanshaha muwaadiniinta ama tan shucuubeed ee qowmiyaadka dalka kuwada nool (Dhaqan), waxaa haddaba, meesha ka baxaya isku dheeli tirnaanta miisaan ee bulshada ka dhaxeysay.

Xuquuqda dadweynaha guudna waxaa ku tuman dad tira yar (shaqsiyaad tira yar).

Sidoo kalena, shaqsiyaad yar oo fara-ku tiris ah ayaa lunsan kara danta-guud. Waxaana abuurma quudhsi iyo wasakhayn loo geysto luqadaha iyo dhaqamada dadyowga kale, islamarkaana waxaa meesha soo gali kara, islawayni dhaqan iyo luqadeed oo la isa siiyo ama la sheegto oo xaqiiqada ka fog.

Ficiladan oo kalena, waa kuwo ku abuuri kara ruuxa nacaybsho. Waana kuwo dadka kala fogeeya.

Haddaba, Xaaladahan oo kale waa kuwo abuuri kara dareen ah in dadka tirada yar ee talada dalka haya ay isu arkaan inay ka sareeyaan dadka kale oo ay iyaga uun talo ka go'do. Dhinaca kalena, dadweynaha tirada badan, waxaa la soo gudboonaada dareen ah gumaysi iyo sharaf-dhac (niyad-jab) ka yimaada nafsadooda, wayna ka xumaadaan. Sidaa darteed, waxay ku qasban yihiin inay xog isticmaalaan siday xuquuqdooda u soo ridan lahaayeen.

Markaasna waxay fooda isdarayaan shaqsiyaadka tirada yar ee danihiisa xukun ilaashanaya. Halkaasna,waxaa ku luma nabadgelyada iyo xasiloonida. Haddaba, sinaan la'aan dimuqraadiyad, dimuqraadiyad la'aan nabadgelyo, nabadgelyo la'aan shaqo, shaqo la'aan horumar, horumar la'aan qaninimo lama helayo/lama gaadhayo.

Haddaba, sinaanshaha shaqsiyaad ama kan shucuubeed ee qowmiyaadka kala duwan ee dalka kuwada nool, waxaa la sugi karaa oo kaliya marka la siiyo xuquuqo iyo fursado siman oo isku mid ah ha ahaato mid bulsho, dhaqaale iyo mid siyaasadeedba, iyaga oo aan loo eegayn qowmiyadooda, luqadoodam diintooda dhaqankooda, jinsigooga (Lab/dhadig), midabkooda, aragtidooda gaar ahaaneed IWM.

Wakhtigan xaadirka ah waxaa dalkan, Itoobiya ka jira nidaam dimuqraadiyadeed oo ku dhisan rabitaanka qaramada, qowmiyaadka iyo shucuuba kala gadisan ee kuwada nool dalka guud ahaan. Sida ku cad, qodobka 25aad ee Dastuurka Jamhuuriyada, Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya (JDFI), waxaa lagu xusay dhawrsanaanta la siiyay sinaanshah xuquuqeed ee qaramada, qowmiyaadka iyo shucuubta kala haysta/aaminsan dhaqamada, diimaha, luqadaha iyo aragtiyada kala duwan.

Waxaa qaran iyo qowmiyad kasta la siiyay xuquuq ay aaya katashi ku samaystaan ilaa heer goosasho, islamarkaana ismaamul gaar ah u yeeshaan, si ay dhaqankooda iyo luqadoodaba u horumarinyaan. Waxaa kaloo la siiyay xuquuq ah inay iskumaamulaan afkooda (luqadooda) hooyo, waxna ku bartaan qoraal iyo hadalba ha ahaatee. Waxaa kale oo loo sugay ka faa'iidaysiga horumarka Deegaanadooda iyo manaafacaadsiga hantida iyo khayraadka dabiiciga ah ee dhulkooda.

## Sinaanta

Sinaantu waxay kaalin muhiim ah ka qaadataa sidii ay muwaadiniintu ama qowmuyaadka kala duwan ee deegaanada dalka ku dhaqani si siman uga wada faa'iidaysan lahaayeen dhaq-dhaqaaqyada horumarka dhaqaale, bulsho, siyaasadeed ama kan dhaqanba ee laga wado dalka guud ahaan. Sidaas awgeed, xukuumada wuxuu xil ka saran yahay:-

- U jihaynta dhammaan muwaadiniinta dalku sidii ay uga faa'iidaysan lahaayeen waayo-aragnimada aqooneed iyo khayraadka ku kaydsan dalkan.
- Kor u qaadista xaaladda dhaqaale ee muwaadiniinta, inay u sinnaadaan fursadaha iyo inay u diyaariso sidii ay khayraadka dalka si caadil ah ugu qaybsadaan.
- Ka hortaga masiibooyinka dabiiciga iyo kuwa insaanigaba, haddii ay dhacdo masiibo waa in si deg-deg ah taakulo loo gaadhsiiyo dadka ku waxyeelooba.
- Taakulaynta Deegaanada ama Quruumaha, qowmiyadaha & Shucuubta dhinaca horumarka dib uga dhacsan.
- Waa inay dhulka iyo khayraadka dalka uga faa'iidayso danaha iyo horumarka dadweynaha
- Ka qaybgelinta qaybaha bulshada hawlaha la xidhiidha dejinta siyaasadaha iyo barnaamijyada horumarineed ee dalka iyo waliba taageerista dhaq-dhaqaaqyada horumarineed ee u shacabku wado.
- Diyaarinta qaab ay haweenku si sinaan ah raga ugala qayb-galaan dhaq-dhaqaaqa horumarka dhaqaale iyo bulsho ee dalka.
- Ilaalinta caafimaadka, nabadgelyada iyo kor u qaadista heerka nololeed ee shacbiga.
- Fidinta adeegyada waxbarashada, caafimaadka, biyaha nadiifta ah, hoyga, cuntada iyo damaanada hawl-gabnimada, si isku dheeli tiran.
- Xurmaynta hawiyada, Qaramada, qowmiyadaha & Schuubta, iyo waliba xoojinta sinaanta, midnimada iyo walaaltinimada ka dhaxeysa.
- U fududeynta sidii u shacabku iskii isku maamuli lahaa, iyadoo laga duulayo mabaadi'da dimuqraadiga ah.
- Gacan ku siinta koritaanka iyo horumarka dhaqamada iyo caadooyinka aan ka hor imaanayn xuquuqda aas'aasiga ah, sharafta aadamaha, dimuqraadiyadda iyo Dastuurka, si isku dheelitirnaan ay ku dheehan tahay.
- Fidinta culuunta sayniska iyo teknoolojiyada, hadba intii karaankeeda ah.
- Waxaa kale oo xukuumadda iyo muwaadiniinta xil ka saran yahay daryeelista deegaanka.

Sinaantu waxay kaalin fir-fircoon kaga jirtaa xasilinta nabadgelyada iyo dhiiri-galinta hawlaha horumarka dalka.

Marka la helo sinaan xuquuqeed oo cadaali ah oo ka dhxeeya muwaadiniinta, ama qaramada, qowmiyaadka iyo shucuubta kala isirka ah, kala midabka ah, kala luqadaha ah, kala dhaqanka ah, kala diimaha ah IWM, ee Deegaanada dalka ku nool.

Sidaas awgeed, sinaan marka la helo ayaa waxaa la gaadhi karaa nidaam dimuqraadiyadeed, marka la helo dimuqraadiyad ayaa nabadgelyana la gaadhi karaa.

Kadibna, marka nabadgelyo la helo ayaa horumar iyo barwaaqaba la tiigsan karaa.

Haddaba, sugida nabadgelyadu qayb libaax ayay ka qaadataa hawlaha dedejinta horumarka iyo ka midha-dhalintiisaba.

### Layliska 2

1. Waa maxay sinaanta horumarka marka aynu leenahay?
2. Deegaanada dalku ma siman yihiin horumar ahaan? Haday haa ama maya tahay Jawaabta tafaasiil dheeri ah ka bixi.
3. Sinaan la'aan horumar hadduu jiro wax saamayn ah ma ku yeelan kartaa, ammaanka goobtaas?
4. Ayaase lagula xisaabtami haday sinaan la'aan joogta ahi ka jirto deegaanada, dhinaca horumarka?
5. Sinaantu sidey dimuqraadiyada u xoogayn kartaa? Nabadgelyadase?

## 3.2 Dhibaatooyinka ka dhalan kara sinaan la'aanta ka faa'iidaysiga

- Haddii aan la sugin xuquuqda sinaanta ka wada faa'iidaysiga?

Haddii aysan jirin sinaansho xuquuq iyo fursadeed oo cadanli ah oo ka dhaxayn karta bulsho goob/deegaan, ama wadan wada degan, dhibaatadeeda ayay leedahay. Matalan, bulshadu haddii aynan helin sinaansho xuquuqeed & fursadeed oo la taaban karo sida:-

Sinaansho-siyaasadeed, sinaansho dhaqaaleed, sinaansho-bulsheed, sinaansho dhaqameed, sinaansho sharciyeed, sinaansho luqadeed, sinaansho diimeed, sinaansho jinsiyeed (Lab/dhadig) IWM.

Markaas halkaas, waxaa ka dhalan kara masiibo ama halis aan la saadaalin Karin oo la soo gudboonaata bulshadaas sinaan la'aanta & cadaalad daradu ka jirto dhaxdooda. Tusaale, dalkan Itoobiya waa dal quruumo & qowmiyado farabadani ku noolyihiin, islamarkaana leh dhaqamo & luuqado kala jaad-jaad ah;

haddii quruumahaas & qowmiyadahaasi aynan helin xuquuqo & fursado siman oo dhammaan ay ku wada qanacsan yihiin, waxaa markaas halkaas ka abuurmaya Farqi & Kala duwanaansho dhaqan-dhaqaale, bulsho iyo siyaasadeedba.

Haddaba, farqigaas & kala duwanaanshahaas la soo gudboonaaday qaybaha bulshada ee la xidhiidha sinaan la'aanta, wuxuu u horseedaa dalka & ummadaba, tafaraaruq, shaki, qas, iyo deganaansho la'aan siyaasadeed, dhaqaale & mid bulshaba. Dhibaatooyinkaasna waxaa ka mid noqon kara sida arrimahani;

- Deganaansho la'aan siyaasadeed oo dalka ka abuuranta sida loolan awoodeed oo dhaxmara kooxaha, muwaadiniinta, ama qowmiyadaha kala duduwan ee dalka kuwada nool sababtoo ah sinaansho la'aanta sharciyeed ee ka jirta awgeed. Markaas, xaaladahani waa kuwo sii murgiya xiisadaha siyaasadeed ee qaybaha bulshada ka dhexeeya.

Markaas, haddii aan la helin awood-qaybsi siyaasadeed oo ay bulshada oo dhan ka dhax-muuqan karto, waxaa hubaal ah in ay soo shaac-baxdo xaalado awood-sheegasho, awood ku tagrifal, musuq-maasuq, kooxaysi iyo amar-kutaaglayn ay ku kacaan kooxo tiro yar, islamarkaana dadweynuhu intiisa badani ay la soo gudboonaato gumaysi, cadaadis iyo dulmi ay kala kulmaan sinaan & cadaalad la'aantaas la xidhiidha siyaasada.

Waxaa kaloo meesha soo galaysa sinaan la'aan bulsheed. Sida haddii aan bulshada dhammaan si siman loo gaadhsiinin adeegyada aas'aasiga ah ee sida waxbarashada, Caafimaadka, Biyaha, Isgaadhsiinta, Wadooyinka/Jidadka), horumarka, dhismayaasha xarumaha dadweynaha IWM.

Sidaas awgeed, sinaan la'aantaas bulsheedna waxay hormood ka noqdaan xasilooni daro ku timaada bulshada iyo khilaaf soo kala dhax-gala muwaadiniinta ama qowmiyadaha kala duwan ee dalka, islamarkaana waxaa abuurmi kara isku dhacyo, sobobi kara dagaalo sokeeye oo dalka ka holca.

Dhinaca kale, haddii u jiro farqi dhaqan-dhaqaale oo qaybaha bulshada ka dhax jira, iyadna dhibaatadeeda gaar ahaaneed ayay leedahay. Matalan, haddii aan fursadaha dhaqan-dhaqaale si siman oo cadaalad ah loo maarayn ama loo maamulin, waxaa hubaal ah in la fisho khilaaf ama isfahan la'aan ku timaada muwaadiniinta/ qowmiyadaha dalka ama Deegaanada wada degan.

Mida kale, haddii iyadna u jiro farqi dhinaca jinsiga ee lab iyo dhadiga ah, waa xaalad keeni karta sinaan la'aan xaga qoyska, oo markaana horseedi karta kalatag iyo bur-bur ku yimaada wada jirka qoyskaas.

Haddaba, guud ahaan noocyadaas sinaan la'aanta ee ka jirta muwaadiniinta, ama qowmiyadaha dalka kuwada nool dhaxdooda, waxay u horseedaa bulshada iyo dalkaba, masiibooyin daran oo cawaaqib xun ku reeba dalka, sida mija-xaabinta nabadgelyada & xasiloonida bulshada guud ahaan. Iyo waliba xagal-daacinta ama ragaadinta horumarka ka socda dalka. Sidaas awgeed, haddii aan la helin sinaansho xuquuqeed oo muwaadiniinta dalka ka dhaxaysa, lama gaadhayo dimuqraadiyad, cadaalad horumar iyo qaninimo ka hanaqaada dalka. Sidoo kalena lama helayo nabadgelyo la isku halayn karo oo waarta.

## Layliska 3

1. Ardayeey, goobihiina ma ka jiraan dhibaatooyin ka dhashay sinaan la'aan xuquuqeed/fursadeed? Faah-faahi Jawaabta haday haa tahay.
2. "Dhibaatooyin bulsho" ayaa ka dhalan kara sinaan la'aanta, ma'sjeegi kartaan macnaha ama kuwa ay yihiin dhibaatooyinka bulsho?
3. Ayaase, ka masuul noqonaya dhibaatooyinka sinaan la'aanta?

## 3.3 Sinaanta Quruumaha, Qowmiyadaha & Shucuubta

### 3.3.1 Xurmaynta luqadaha, dhaqamada iyo astaamaha kalee quruumaha, qowmiyadaha, iyo shucuubta Itoobiya, faa'iidada ay u leedahay dhismaha hanaanka dimuqraadiyadeed iyo aas'aasida midnimo adag



Jaantuska 3.2. Itoobiya waa dal leh Qowmiyado kala duwan

- Waxaad ka fahanteen sawirka kor ku xusan saxiibadiin la wadaaga?

Sinaantu waa qodob ka mid ah qiimaha & qaayaha dimuqraadiyadu leedahay. Erayga sinaan macnihiisu maaha isku ekaansho, balse waa lahaanshaha xuquuqo & fursado siman oo muwaadiniinta ka dhexeeya.

Haddaba, iyada oo ay meesheeda tahay kala duwanaanshaha xaga isirka, midabka, dhaqamada, diimaha, luqadaha, jinsiga IWM, ayaa hadana la siiyay xuquuqo siman qaramada, qowmiyadaha & shucuubta kala duwan ee Dalkan Jamhuuriyada Dimuqraadiga ee Federaalka Itoobiya. Sidoo kale dhammaantood sharciga hortiisa way u siman yihiin.

Waxaana sinaanshaha xuquuqaha kala duwan ee la siiyay quruumaha, qowmiyadaha iyo shucuubta dalka, lagu xusay cutubka 3aad ee Dastuurka Federaalka qaranka Itoobiya.

Waxayna kala yihiin noocyadan sinaansho ee hoos ku xusan:-

1. Sinaanta siyaasadeed
2. Sinaanta dhaqaale
3. Sinaanta sharci
4. Sinaanta jinsi
5. Sinaanta luqadeed
6. Sinaanta diimeed etc.

Haddii aynu wax yar ka sheekayno faa'iidada xurmayntu ay u leedahay nidaamka dimuqraadiga ah & midnimada bulsha-weynta dalka Itoobiya, waxaa tusaale inagaga filan, waa iyada oo la is bar-bardhigo Itoobiyada cusub ee Maanta & Itoobiyadii hore ee Shalay.

Haddii aynu wax yar dib u jaleecno wakhtiyadii xukuumadihii hore ee Itoobiya, waxaa marag madoon ah inaysan kuwaasi xurmayn ama wax qadarin ah siinin dhaqamada, luqadaha & astaamaha kale ee qaramada & qowmiyaadka iyo shucuubta.

Xukuumadahaasi waxay ahaayeen kuwo kutuntay xuquuqda & karaamadii dad-weynaha Itoobiya, waxayna badeen silic iyo saxariir. Waxayna lumiyeen kalsoonidii shacabkooda. Waxayna

xaqireen ama dafireen jiritaanka shucuubta qaarkood, gaar ahaana, ummada Soomaaliyeed ee Deegaankan balaadhan ku nool, iyagoo nagu sheegay inaanan Itoobiyaan ahayn, balse aan ahayn shisheeye. Taasna, waxay ku tusaysaa, Inkiraada xaqa & xurmada ruuxa bani aadanka ahi ku leeyahay dalkiisa.

Kadib markii halgan adag loo galay sidii loo soo ridan lahaa sharafta, karaamada & xuquuqda shucuubta dalka guud ahaan, ayaa waxaa lagu guuleystay in meesha laga saaro ugu dambayn taliskii kaligii taliyihii Mengistu, iyo xukuumadiisa dhiig-miiratada ahayd.

Haddaba, markii wadanka laga dhaliyay nidaamkan dimuqraadiyadeed, ayaa waxaa la qoray dastuur qaran oo ay dhammaan qowmiyadaha kala duwan ee dalku ka qayb-qaateen. 1995, ayaana dastuurka la ansixiyay. Sidaas awgeed, quruumihii, qowmiyadihii & shucuubtii dulmanaa ayaa aqoonsi sharci la siiyay, waxaana lagu xusay Dastuurka sinaantu inay lafdhabar u tahay dalkan Itoobiya.

Sidaas awgeed, dhaqamadii & luqadihii dulmanaa ayaa xurmayn lagu siiyay dastuurka.

Taasina waxay dalka u horseeday in la dhiso hanaaan dimuqraadiyadeed oo ay dhammaan dadweynuhu kuwada noolaadaan. Sidoo kale waxaa ummad walba fursad loo siiyay inay ismaamul iskeed ah dhisato oo aayahooga ka tashato haday tahay siyaasad, dhaqaale, bulsho & dhaqanba.

Waxaana xurmayn la siiyay dhammaan dhaqamada, luqadaha, diimaha iyo astaamaha kale ee shucuubta Itoobiya ku nool, taasina waxay dalka u horseeday in la dhiso midnimo adag oo waarta. Dhinacna iska dhigta kala duwanaanshaha dhaxdooda islamarkaana kawada shaqeeya danta guud ee dalka horumarkiisa.

## Layliska 4

1. Waa maxay sinaanta ka dhaxeyn karta qowmiyadaha Itoobiya kuwada nool?
2. "Sinaansho-shucuub", maxay ka dhigantahay?
3. Sidee loo dhisi karaa hanaan dimuqraadiyadeed, iyo midnimo adag oo dalka ka dhalata?

## 3.4 Sinaanshaha Jinsiga

### 3.4.1 Faa'iidooyinka ay leedahay sinaanta jinsigu

- What is the significance of promoting gender equality?

Sinaanshaha jinsigu waa sinaanta xuquuqeed iyo tan fursadeed ee ka dhaxaysa lab & dhidiga ama ragga & haweenka. Taariikhiyan, haweenka lamasiin jirin tixgalin amase, lalama simi jirin ragga dhinacyada fursadaha & xuquuqahaba. Haweenka lalama simayn ragga hadaytahay fursadaha dhaqaale, bulsho, siyaasadeed, ama dhaqanba.

Arrimahaas takoorka haweenka lagu sameyn jirayna waxay badeen dumarka inay ka hoos maraan ragga qayrkooda ah.

Haddaba, manta waxaa jirta in xuquuq-sinaansho oo sharci ah la siiyay ragga iyo haweenka, hadaytahay fursadaha shaqo dhinacyada arimaha bulsho, dhaqaale, siyaasad iyo wixii la xidhiidha.

Sidaas awgeed, xukuumada & dadweynahaba wuxuu xil ka saran yahay xuquuqdii dastuur ee haweenka la siiyay in la dhawro islamarkaana, la dhaqangaliyo oofinteeda. Sidoo kale, haweenku inay u guntadaan sidii ay u ilaashan lahaayeen xuquuqdaas dastuuriga ah ee ay manta heleen.

Sinaantaas xuquuqeed ee la siiyay waxay gacan ka geysan kartaa kaalinta haweenku ku leeyihiin ka shaqeynta hawlaha horumarka iyo waliba inay haweenku hal-bawle u noqon karaan horumarka laftigiisa.

## Layliska 5

1. Ardayeey goobihiina degmooyinkiina ma jiraan sinaan jinsiyeed?
2. Waa maxay kala duwanaanshaha ragga & haweenku? Dhinacyada shaqo?
3. Haweenku ma ka karti & maskax yar yihiin ragga? Faalo ka baxsha.

## 3.5 Naafanimada

### 3.5.1 Faa'iidada ay leedahay xurmaynta Xuquuqda dadka naafada ah



Jaantuska 3.3. Curyaamiin samaynaysa Isboorti.

- Saaxibadiin kala sheekaysta waxa aad ka fahanteen sawirkan?
- Ma u maleynay saan inu qofka naafada ahi qaban karo hawlkasta?

### Sheeko dhax martay Arday Axmed iyo Mudane Cigaal

Arday Axmed: waxaan kaaga mahad celinaya sida aad iiga ogdaalatay wareysigan inaan kulayeesho.

Mudane cigaal: waad mahadsantahay sida aad fursadan wareysi iigu fidisay.

Arday Axmed: halkeebaad ku dhalatay? Kuna barbaartay?

Mudane Cigaal: waxaan ku dhashay tuulo katirsan Gobolka Jig-jiga. Waxaanan ku soo barbaaray isla tuulada qoyskayaga dhexdiisa, kaas oo ka koobnaa hooyo iyo Aabe iyo 5 ubada oo kala ah saddex wiil iyo laba gabdhood.

Arday Axmed: hadda meeshan aad joogto sidee baad ku timid?

Mudane Cigaal: waxaan immiday muddo kadib, markii aan ku caga beelay qarax miino dhulka lagu aasay wakhti hore anigoo xoola jir ah. Marka hore, waxaan halkan u immiday inaan daaweeyn ka raadsado. Sababta kale e igu sii kaliftay inaan halkan u soo wareego, waxay ahayd dhibaatooyin dhanka aragtida la xidhiidhay oo ay bulshadii tuuladayadu ka qabeen dadka curyaanka ama naafada ah. Matalan, qoyskayaga

ayaa igu dhihi jiray ha bixin, guriga iska fadhi, waayo, dadku ayayna ku arkin, islamarkaana isku kaa soo tilmaamin curyaan nimdaada.

Arday Axmed: halkan markaad timid kadib bulshada magaaladan sidee bay tahay aragtidooda ku wajahan naafanimada?

Mudane Cigaal: runtii, markii aan soo gadhay halkan lama kulmin aragti ka duwan tii aan ka soo tegay; mana jirin sidoo kale cid isoo dhaweysata. Waxaan ku noolaa masaajida iyo darbiyada dhismyaasha hoostooda oo i ahaa hoy. Sidaas iyada oo ay tahay, haddana waxaa jiray qaar badan oo bulshada goobtan ah oo naxariis ii muujin jiray, haday tahay xag dhaqaale iyo tala ahaanba.

Arday Axmed: hadda maxaad ka shaqeysaa?

Mudane Cigaal: hadda hawlgab ayaan ahay. Balse ka hor, waxaan mudo dhan 30 sano ka soo shaqeeyay Geerash ku yaala magaaldan, islamarkaana aan ka ahaa farsama yaqaan ku wanaagsan dhanka daayactirka gawaadhida guud ahaan. Hawlihii waxqbad ee aan ka soo qabtay geerashkaas, waxay ahaayeen kuwa loo bogay, islamarkaana raad-reeb fiican ku reebay maskaxdayda iyo qanacsanaan xagga nabsada ah. Illaahay mahadi, hadda waxaan ahay Aabe qoys baladhan leh islamarkaana degan guri hanti ah oo aan anigu dhistay iyo hanti kaleba oo aan qoyskayga baahidiisa ku daboolo hadda iyo mustaqbalka ba. Hadaba, hadii aan xiligaas shaqeysan, oo aan noqon lahaa dawarsade, ma noqdeen maanta sida aan ahay.

ARday Axmed: adiga oo naafa ah, haddana naafanimadaadisi kaama hor istaagin inaad xataa shaqo culus aad ka shaqeyso, markaas maxaad maanta u soo jeedin lahayd oo tala ah dadka kale ee naafada ah sidaada oo kale?

Mudance Cigaal: Anigu makraan shaqada galayay waxaan ku bilaaby mushaar yar, balse anigu mayaraysan shaqada, waxaanan isku qanciyay inuu mushaarkan yari iiga khayr badanyahay mashaqeystanimada iyo dawarsiga cid kale. Markaas, waxaa loo baahanyahay in la ogaado naafanimadu inaysan ahayn micnaeedu mashaqeystanimo iyo quus raja goys ah. Hadaba, hadii la yeesho kalsooni, la saxo aragtida khaldan, islamarkaana la helo gacan qabad, waxay qabsan karaan waxqabad wax u tari doona jiilasha mustaqbalka sidaas awgeed; cid kasta oo naafa ah waa inay la timaadaa

ka go'naan shaqo, iyada oo nan lakala xulanayn shaqooyinka, islamarkaana loo baahanyahay in lala yimaado dadaal dheeri oo wax lagu qabsanayo.

Arday Axmed: mahadsanid!

Mudane Cigaal: Adiguna sidoo kale, mahadsanid!

## Layliska 6

Su'aalaha soo socda ka jawaaba idinka oo ka duulaya wareysiga kor ku xusan.

1. Nolosha Cigaal maxaa dhaxalgal ah oo aad ka koradh sateen? U soo bandhig saaxibadaa,
2. Muxuu mudane Cigaal ulajeeday marka uu lahaa naafanimadu maaha dawarsade iyo wax dhintay?
3. Maxaa mudane Cigaal ku keenay naafanimada/ curyaanimada? Shilalka noocan oo kale si loo yareeyo, maxaa loo bahanyahay in la sameeyo?

Su'aashan ardaydu ha ka wada xaajoodaan iyagoo koox-koox isku qaybinaya, kadibna koox kastaba, ha u soo bandhigto fasalka, jawaabtooda.

Xurmaynta/dhawrista xuquuqda dadka dhibanayaasha xaga xubnaha jidhkooda haday tahay curyaan, indhoole, dhagoole, laangadhe, IWM, waa waajib saran dhammaan shacab & xukuumadba xanaaneynta/daryeelista dadkan aynu kor ku soo sheegnay. Waayo waa qayb ka mid ah bulsho-weynta dalka markaas dalkana xuquuq bay ku leeyihiin in loo fidiyo adeegyada aas'aasiga ee sida caafimaadka, waxbarashada, biyaha nadiifta, isgaadhsiinta.

Gaar ahaan dadkan dhibanayaasha ahi waxay leeyihiin baahi gaar ah tan bulshada kale ka duwan. Sidaa awgeed, waxaa waajib muqadas dhaqamiyan & diiniyan in taakulo-gaar ah loo fidiyo si ay u dareemaan jacaylaha, taageerada, walaaltinimada iyo soo dhawaynta loo hayo iyaka. Sidoo kale, xubnahan bulshada ka tirsani, waa in la tusaa inaysan ka garaad & karti hoosayn bulshada inteeda kale, markaasna ay tartan la sameyn karaan arimaha dhaqaale, bulsho iyo kuwa siyaasadeedba.

Marka si wanaagsan oo ay walaaltinimo ku dheehan tahay marka loola dhaqmo, ama loola macaamilo dadkan, waxay qaadanayaan aragti ah in ay la siman yihiin bulshada inteeda kale, waxayna qaadanayaan aragti ah in ay la siman yihiin bulshada caadiga ah, islamarkaana waxay yeelanayaan dareen ah dad & dal jacayl ay u qabaan.

Faa'iidada xurmaynta xuquuqda dadka naafada ahi leedahay, waxaa kale oo ka mid noqol kara, iyaga oo meesha ka saara dareenkii ahaa dhawrista & baahida gargaar ay dad ka sugaan had iyo jeer.

Waxaa kale oo xurmaynta xuquuqda dadka naafadu gacan ka geysataa abuurista jawi habboon oo ay dadkan dhibanayaasha ahi kaga qayb-gali karaan hawlaha horumarka la xidhiidha iyo kaalinta ay ku leeyihiin iyagu.

## Layliska 7

1. Dadka naafada ah caawimaad noocee ah ayay u baahan yihiin?
2. Dadka dhibanayaasha ah sidey uga qayb-qaadan karaan hawlaha horumarka dalka?

3. Bulshadeena Soomaalidu siday ula dhaqantaa dakan naafada ah?

## 3.6. Dhibaatooyinka ka dhalan kara dhawris la'aanta xuquuqda sinaanshaha diimaha

### b) Heer shaqsi ahaan

Waxaa loo baahanayahay inuu qofkasta ogaado sida ay diintiisu qiimo ugu leedahay isaga/iyada, inay dadka kalena diintoodu qiimo lamid ah iyagna ugu leedahy. Muwaadin kastana waxaa la gudboon inuunan xajiimayn diimaha kale, islamarkaana indha.midaatay ku dhawro dhamaan diimahaa kaladuwan. Sidoo kale, waxaa loo baahanyahay inaanan cidna lagu cadaadin caqiido uu san rabin ama aaminsanayn.

Sidaa daraadeed, hadii uu muwaadin kasta fahmo arintan, waxaa abuurmaya jawi haboon oo si nabadgelyo ah lagu wada noolaado, islamarkaana lagaga hortago wax kasta oo qalalaase iyo colaad u horseedi kara dadka iyo dalkaba.

### t) heer qaran ahaan

sida lawada ogsoonyahay dalkeena Itoobiya waxaa mudo aad u dheer ka jirtay diin-dawladeed taas oo cabudhin iyo cadaadis baday diimaha kale, islamarkaana meesha ka saartay fursad kasta oo sinaansho-diimeed lagu abuuri karayay.

In kasta oo xiligii dawladii Dergiga, dawlada iyo diinta lakala soocay, haddana waxaa si aan muran kujirin loogu kala soocay diinta iyo dawlada markii la ansixay dastuurka Federaalka ee wakhti xaadirka, waxaana la meel mariyay in diinta iyo dawlada midba ay ku eekaato xilka iyo waajibaadkeeda, gaar ahaaneed. Sida ku cad qodobka 11aad ee dastuurka. Kaas oo qeexaya:

1. Kala soocanaanta diinta iyo dawlada
2. Diin dawladeed inayna jirin
3. Dawladu arimaha diinta ma faragelin karto. Sidoo kale diintuna arimaha dawlada ma faragalin karto

Markaas, hadii ayjirto in diin laga koryeelo diimaha kale ama diin laga hoos mariyo kuwa kale, waxaa adkaanaysa in si buuxda loo hirgeliyo sugida xuquuqaha muwaadiniinta. Hadaba, ilaa inta ay jiraan xaalado la xidhiidha xadgudubyo iyo cabudhin loo geysto qaybo ka mida bulshada, lama filan karo in la helo degenaansho waara oo lagu naaloodo, waayo cida tabaneysa dhib, waxay ku kici kartaa wax kasta oo ay xuquuqdooda ku soo ridan karaan. Sidaasna, waxaa hubaal ah in lagalo dagalo sokeeye oo horseedi kara qalalaase iyo dagaalo daba-dheeraada oo dalka

ka hor istaaga sidii looga saari lahaa dib u dhacnimada iyo faqriga sidaas awgeed, waxaa loo baahanyahay in la dhawro xuquuqaha sinaansho ee diimaha kala duwan si ay iyaguna uga qayb qaataan hawalaha lagu xoojinayo dhismaha hanaanka dimuqraadiyadeed ee dalka laga wado.

### Layliska 8

Kawada hadla su'aalaha soosocda.

1. Dhawris la'aanta xuquuqda sinaanshaha diimaha, maxay dhibaato u keeni kartaa shaqsiyan iyo qaran ahaan ba?
2. Maxay tahay faa'idada laga helayo, diinta iyo dawladu inay midba tan kale faragelinin?

## Gunaanadka Cutubka 3^aad^

Aqoonsiga iyo xurmaynta xuquuqda sinaansho waa arin fure u ah xoojinta nidaamka dimuqraadihadeed. Xushmeynta xuquuqaha qowmiyaadka & shucuubta dalku, waxay sahlaysaa xaqiijinta xuquuqahooda sinaansho. Sidoo kale, sugida xuquuqda sinaan waxay u sahlaysaa inay si siman oo midaysan ugu wada dhaqmaan odhaahdooda axdi ee dastuurka. Haddii ay dhibaato la soo gudboonaatana hab nabadgelyo ayay ku xalinayaan. Waxayna abuuraan jawi haboon oo fir-fircoon oo lagu horumarinayo deegaanadooda.

Wakhtiyadii xukuumadihii hore maysan jirin sinaan astaamo qowmiyadeed, luqadeed, diineed iyo dhaqameed oo ka dhaxeeyay umadaha dalka.

Hase yeeshee, wakhtigan xaadirka ah ummadaha Itoobiya waxay heleen aqoonsi dastuuri ah. Waxaana hadda ka jira dalka nidaam dimuqraadiyadeed oo suura geliyay inuu ruux kasta/muwaadin kasta, leeyahay xuquuqda ah isticmaalka luqadiisa hooyo, iyo qaadashada diinta u rabo. Tanina waa mid bildhaaminaysa rajada wanaagsan ee mustaqbalka dalka iyo ummadaba.

Dhinaca kale, xiliyadii nidaamyadii hore ma jirin sinaansho ka dhexeeyay raga & haweenka dhinacyada fursadaha shaqo iyo dhaqaaleba. Balse, wakhtigan xaadirka ah raga & haweenka waxaa la siiyay xuquuqo iyo fursado siman oo dastuuri ah.

Dadka naafada ahi waxay leeyihiin xuquuq iyo xornimo kastoo la mid ah tan dadka kale leeyahay. Sidoo kale, dadka naafada ah waa dad karti shaqo, maskax iyo muruq leh sida dadka caadiga ah. Haddaba, dadkaas waa in lagu garab galo taageero iyo dhiiri galin gaar ah si loo dhiso dareenkooda & damiirkooda gaar ahaaneed.

### Ereyada furaha u ah cutubka 3^aad^

| | |
|---|---|
| maamul: | xubnaha maamulka ama wakiitada shacab ee goob ka jira |
| faaidada: | waxatar, gacan ka geysasho |
| door: | sficil, hadaf |

## Layliyada guud ee Cutubka 3aad

I. Erayadan soo socda ku qor 'Run'ama 'Been'

1. Xurmaynta xuquuqda ismaamulitaan ee qaramada, qowmiyadaha & shucuubta, waa astaanta nidaamka dimuqraadiyada dhabta ah.
2. shucuubtu hadii ayna xataa si siman uga wada faa'idaysan horumarka, rabitaankoodu wuxuu yahay inay sii wada noolaadaan.
3. haweenka jamhuuriyada dimoqraadiga Federaalka Itoobiya waxay xuquuq uleeyihiin inay yeelan karaan hanti,gudbin karaan,islamarkaana dhaxli karaan.
4. Haddii aan la dhawrin xuquuqda sinaanta haweenka, waxay waxyeelo u leedahay dumarka oo kaliya.
5. hadii si buuxda loo dhawra xuquuqda naafada,waxaa meesha ka baxaysa sinaanta iyo wadaniyada.

II. Isku aaddi erayada ku kala hoos xusan xarfaha 'B' iyo 'T' midba ta ku haboon.

| | B | T |
|---|---|---|
| 1. | Qaybsiga faa'iido iyo waajibaad | b) Ismaamul |
| 2. | Nacaybsho iyo kala fogaansho abuuranta. | t) la'aanta ka faaidaysi siman |
| 3. | Hogaanka ama Maamulka dad deegaan ku dhaqan. | j) Aas'aaska midnimada |

III. Meelaha ban banaan ee soo oscda ku buuxiya eray ama weedh.

1. Nidaamkan Federaaliga ahi wuxuu ka kooban yahay __________ dawlad deegaan.
2. Faraqa & Midnimada bulsho ee qaramada, qowmiyadaha & shucuubta dalku waa _____________.

IV. Su'aalaha soo socda ka dooro Jawaabta saxda.

1. Midka mid ah weedhahan soo socda, tee baan ahayn faa'iidooyinka laga helo, iskaa isku maamulitaankaa qowmiyadaha (aaya ka tashiga) ismaamul ee qowmiyadaha dalku
   b) xuquuqda aaya ka tashiga iyo dhisitaan xukuumad gaar ah.
   t) kala sareynta iyo hooseynta gumaysi iyo nacaybsho
   j) Go'aaminta wax kasta iyo si kasta oo waafaqsan rabitaankooda.

2. Mid ka mid ah dhibaatooyinka ka dhasha la'aanta xuquuqda sinaansho ee kawada faa'iidaysi
   - b) Saboolnimo & dib u hadhnimo
   - t) qalalaase & dagaalo
   - j) ragaadin horumar
   - x) Dhammaan.
3. Weedhahan soo socda teebaan sax ahayn?
   - b) dulqaadka & isfahanku faa'iido weyn ayay u leedahay sinaanta wada noolaansho ee shucuubta
   - t) dalka aysan ka jirin sinaan, wuu lahaan karaa nabadgelyo & horumar
   - j) haddii la rabo in la helo midnimo waarta, waxaa qasab ah in la dhawro xuquuqda sinaansho
   - x) waa inaysan jirin diin sareysa ama mid hooseysa.
4. Marka la eego xuquuqda dumarka, tee baa ah fikradaha khaldan?
   - b) Haweenayda xaaska leh iyo tan aan lahayn xaaska waxay leeyihiin xuquuq siman.
   - t) Haweenka dalku, waa qayb ka mid ah bulshada tira ahaan kala badh.
   - j) Sugida xuquuqda haweenka, ragu shaqo kuma laha.
   - x) Sugida xuquuqda haweenku, waa sugida xuquuqda bulshada.
5. Faa'iidooyinka ay leedahay dhawrista xuquuqda dadka naafada ah
   - b) Waxay sahashaa reebitaanka takoorka lagu sameeyo dadka naafada ah
   - t) Waxay sahashaa reebista dareenka dulsaarnimo iyo daryeelis
   - j) Sinaanta & dareenka dul jacaylnimo, waxay dadajiyaan hawlaha horumar.
   - x) Dhammaan.

### V. Su'aalaha soo socda Jawaabo koo-kooban ka bixiya.

1. Faah-faahiya xuquuqaha qaramada, qowmiyadaha iyo shucuubta ee lagu xusay Dastuurka J.D.F.I.
2. Sinaanshaha Jinsigu (lab/dhidig) maxay ka kooban tahay?
3. Maxaa adiga shaqsi ahaan kula gudboon sidii loo ilaalin lahaa xuquuqda dadka naafada ah, bulshada iyo xukuumadase?